

**SOMALISKA AF SOOMAALI**

# **U CODEE DAWLAD CAGAARAN 19-KA SEBTEMBER**

Haddii aad dooran lahayd sida uu adduunku u ekaanayo, malaha wuxu noqon lahaa mid cagaar badan. Malaha wuxu noqon lahaa mid sidan ka casrisan, ka bani-aadminimo badan oo bay'ada uga fiican. Malaha waxa aad dooran lahayd xorriyad uu shakhsigu helo, kobcitaan waaraya iyo xasillooni bulsho. Waad dooran kartaa. Doorashadii baar-lamaanku waa bisha sebtember. Xisbiga bay'adu (Miljöpartiet)wuxu rabaa in uuu bulshada oo dhan ku sameeyo isbedel cagaaran. Taasi waa sida u fiican Iswiidhan.

Doorashadaadu waxay gacan ka gaysan kartaa saamayn cagaaran oo xoog leh oo lagu yeesho dawlad cusub.

Dooro siyaasad leh himilooyin – ku codee cagaar 19-ka sebtember!



## **SAAXIIBADA CIMILADA**

Bulshadu waxay u baahantahay in la casriyeeyo. Si looga dabbaasho taxaddiyada mustaqbalka wawa loo baahanyahay siyaasad cusub. Iswiidhan wawa hor yaalla tijaabooyin waaweyn oo ku saabsan cimilada, dhaqaalaha iyo shaqada. Xisbiga bay'adu (mp), wuxu arinkaas ka leeyahay siyasad. Isbedel cagaaran oo la sameeyaa wuxu ka dabbaalanaya cimilada, bulshada wuxu ka dhigayaa mid casri ah, wawaanu keenayaa shaqo iyo barwaqaqo-sooran. Waa deegaan wanaagsan iyo dhaqaale wanaagsan.

Iswiidhan waxay xil iska saaraysaa cimilada. Waddamada ugu hor dhiirrada ayaa noqonaya kuwa caalamka hoggaamiya. Kuwa ugu dambeeyaan waxay noqonayaan rajo la'aan xagga dhaqaalaha iyo horumarka. Waddankeenu wuxu hoggaanka u qaban karaa wax ka qabadka cimilada. Xisbiga bay'adu wuxu doonayaa in uu maalgelin weyn ku sameeyo kaabayaasha adeegga, farsamada iyo tamarta. Maalgelin cagaaran waxay keenaysaa shaqooyin iyo kobcitaan waaraaya, ayadoo isla markaana la hakinayo isbedelka cimilada.

Waxay ahaan doontaa wax laga macaasho in lala saaxiibo cimilada. Qof waliba raad ayuu samaynayaa. Qof waliba waa muhiim, waana inay dad badani cimilada u sameeyaan wax badan. Hab-nololeedka waaraaya, uma baahna inuu noqdo naf-huritaan. Xalalku haddaba waabay jiraan. Wawa loo baahanyahay waa siyaasad soo shaac-bixisa. Xisbiga bay'addu (mp) wuxu rabaa inuu dhisu Iswiidhan ay doorashooyinka cimilada u fiicani fududyihii oo ugu raqiisanyihii.

## **CAGAARKU WUXU ABUURAYAA SHAQO**

Shaqooyinka mustaqbalku waa shaqooyinka cagaaran. Shaqooyin badan ayaa geli doona astaanta cimilada. Maalgelinaha xadiidka tareenka, xadiidka dusha socda iyo waddooyinka baaskiiladuhu waxay keenayaa shaqooyin. Maalgelinta quwadda dabaysha, quwadda mawjadaha, qorraxda iyo wax-kuool ka dhigidda tamarta waxay keenayaan shaqo. Himilooyinka sare ee cimiladu, waa ka jawaabidda isbedellada cimilada, shaqo la'aanta iyo hoos u dhaca xaaladda dhaqaale.

Qandaraas qaateyaashu muhiimad gaar ah ayey u leeyihiin horumarka bulshada. Fikrado cusub, u hawl-galka bay'ada iyo xil iska saaridda bulshada waxa faafiya qandaraasleyaasha. Taas ayuu Xisbiga bay'adu rabaa inuu horumariyo. Wawa loo baahanyahay in shirkadley ahaantu ay noqoto mid sahlan oo xasilloon badan oo ay halisteedu yartahay. Markaa dad badan ayaa isku deyaya inay ka dhabeeyaan himilooyinkooda. Markaa shirkadaha yaryar ayaa koraya. Taas way ku macaashaysaa Iswiidhan.

Waxa la joogaa wakhtigii laga gudbi lahaa bulshada ah gado oo xoor. Xisbiga bay'adu wuxu doonayaa in uu dhiirrigeliyo isticmaalid cimri-dheer ayadoo la dhimayo cashuurta dadban. In alaabta la dayactiro ayaa noqon doonta mid ka raqiisan in mid cusub la iibsado. Markaa shaqooyinka dhinaca

adeegga ayaa badan doona. Isbedelka cagaaran waa mid wanaagsan oo macaash badan, laakiin wawa loo baahanyahay in cidi ku dhiirrato fikrad cusub. Xisbiga bay'ada ayaa ku dhiirranaya.

## **XASILLOONIDU WAA XORRIYAD**

In dadku shaqeeyaan waa shardiga barwaqaqo-sooran-ka. Laakiin barwaqaqo-sooran aan caawinayn qofka bilaa shaqada ah ama qofka aan shaqaysan karin, uma qalmo in lagu magacaabo barwaqaqo-sooran. Innagu haddaynu nahay dadka xil ayaa ka saaran qaarkeenba qaarka kale. Xasilloonida oo korodhaa waxay yaraynaysaa takoornaanta, Iswiidhan oo dhanna waxay ka dhigaysaa mid xooggan. Nadaamkii xasilloonida ee burburay waa in dib loo soo dhiso.

In alla inta dadku jirranyihiin waxay heli doonaan gunnada bukaanka. Dhammaan dadka aan hay-san shaqo waxay soo gelayaan caymiska shaqola'aanta. Bulshadu waa in ay qofka siiso caawimada uu u baahanyahay, sida dhaqan-celin ama waxbarasho. Dadku kuma caafimaadayaan in faqirnimadoodu badato darteed. Shaqaduna kuma kordhayso in ay dad badani faqiraan darteed.

Xisbiga bay'adu wuxu rabaa inuu abuuro bulsho la ogolyahay in dadku kala duwanaan karo. Dadka la kulmay guuldarrooyin, waxay heli doonaan fursad dhab ah oo ay dib ugu soo laabtaan. Xasilloonidu waa xorriyad. Xasilloonidu waxay keenaysaa in dad badani ku dhiirradaan tijaabada fikrado cusub. Fikradaha waa loo baahanyahay si bulshada loo horumariyo oo ay u fiicnaato. Afkaarta xisbiga Bay'adu waxa weeyaan sinnaansho badan, takoorid yar iyo bani-aadannimo badan.

## **CODKAAGA WAA LA XISAABINAYAA**

Mushkiladaha maanta taagan lagagama bixi karo xalalkii shalayto. Isbedelka cagaaran waxa aynu ku badbaadinaynaa cimilada, waxaynu ku abuuraynaa shaqooyin badan iyo dhaqaale wanaagsan. Xisbiga bay'adu waa awood lagu xisaabtami karo, markaa haddaynu sii tiro badannana waynu sii xoogaysanaynaa. Waxad xubin ka noqon kartaa Xisbiga bay'ada adiga oo ku sms bixinaya xubinnimada. Lambarkan 72456 u dir sms aad ku qorayso; mpmedl iyo lambarkaaga shahsiga ah oo sanadku afar lambar yahay. Qii-maha: 50 karoont + khidmadda diraalka.

Waxa aanu u baahannahay lambarkaaga shahsiga ah si aanu u garanno qofka aad tahay. Sidoo kale soo dir ciwaan e-mail si aanu kuula soo xiriiri karno sahaalo. Waxa aad sidoo kale xubin ku noqon kartaa in aad kaadh ku bixiso xubinnimada ama aad dalbato kaadh qaansheegad.

Si aad ugu bixiso xubinnimada ama aad u dalbato kaadh qaansheegad, gal boggan: [www.mp.se](http://www.mp.se) / [blimedlem](http://blimedlem). waxa kale oo aad wici kartaa lambarkan 08-545 224 50.

La xiriir xisbiga bay'ada adiga oo booqanaya boggan [www.mp.se](http://www.mp.se) ama wac lambarkan 020-94 20 00.